



XAFIISKA QARAMADDA MIDDQBAY U QAALIBLSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Warsaxaafadeed degdeg ah

WAR-SAXAFADEED 12/2014

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha Soomaaliya ayaa cambaareeyey dilka loo geestay Shaqaalaha UNODC

Muqdisho, 7 April 2014 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha Soomaaliya, Nicholas Kay ayaa cambaareeyey dilka manta loogu geestay laba qof oo la taliye ahaan ugu shaqeenayey xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha la xiriira maandooriyayaasha iyo dunuubta kaleba (UNODC).

Labada lataliye ee caalamiga ahaa waxay joogeen magaalada Gaalkacyo si eey u taageeraan dadaalka uu xafiiska UNODC kawado gobolka. Waxaana lugu dilay ragaasi airporka Gaalkacyo qeeybta Puntland ee Soomaaliya, waxaana dilay rag aan heeybtooda la aqoon.

“Waxaan cambaareynayaa dilka foosha xun leh. Saaxiibadeenna ka tirsanaa Qaramada Midoobay waxay u howl gelaayeen siday u taageeri lahaayeen baahida dadka Soomaaliyeed ay u qabaan helitaanka mustaqbal ay nabad iyo xasillooni ku dheehantahay. Wax cudur daar ah looma helaayo weerarka naxariis la’ aanta ah. Waxaan ugu baaqayaa mas’uuliyiinta in ay sameeyaan baaritaan buuxa sida ugu dhaqsiiyaha badan leh eey dambiileyaashane u hor keenaan cadaaladda ayadoon jirin wax dib u dhac ah. Waxaan tacsii u dirayaa qooyasaskii iyo asaxaabtii dadkii la dilay. Qaramada Midoobay waxay sii wedi doontaa taageerada muhiimka ah eey u fidibneeyso dadka Soomaaliyeed kuwaasoo kasoo kabanaayo labaatameeyo sano oo xasilloni la’ aan ay ka jirtay dalka ” ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah, Mudane Kay.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta Aleem Siddique
Tel: +254 41 350 6603 • Email: unsom-spokesperson@un.org

Fadlan eeg rugta Internet-ka:
www.unsom.unmissions.org



@UNSomalia

[facebook.com/UNSomalia](https://www.facebook.com/UNSomalia)